Isku Qorida Doorashada

Doorashooyinka Dawlada dhexe, Goboleed iyo Deegaanka Fiktooriya

MACLUUMAAD MUHIIMA

Foomkaan macluumaadka la duubay waa gargaar la tarjumay si uu kaaga caawimo inaad iska qorto doorashooyinka Dawlada Dhexe, Dawlad Goboleedka iyo Dawlada hoose. Waxaad u baahan tahay inaad ku buuxiso meesha lagu muujiyey **Ingiriis**. foomkaani ma keydinayo macluumaadkaaga, sidaas darteed markaad gaarto botonka daabicida dhamaadka, waxaad u baahan doontaa **inaad daabacdo – saxiixdo** – **markhaantina kula saxiixo**. Ka dibna boosta soo dhigto foomka oo la buuxiyey lana saxiixay:

Victorian Electoral Commission
Reply Paid 66506
Melbourne Vic 8001
(Farankaboollo looma baahna haddii aad ka soo dirayso Australia.)
ama, waxaad ku soo diri kartaa fakis (03) 9277 7126.

Waxaad heli doontaa warqad kugu wargelinaysa isqoridaada rasmiga ah ka dib markaanu hello foomka oo daabacan soona gudbino.

Ansixinta inaad hesho macluumaadkaan waxaa lagu muujiyey ***Xeerka Dawlada Dhexe ee Codbixinta 1918*** iyo ***Xeerka Codbixinta Fiktooriya ee 2002***.

Is qorida iyo codbixintu waa khasab

Haddii aad shuruudihii buuxisay, waxaa lagaaga baahan yahay inaad isqorto codna ka bixiso doorashooyinka deegaanka, dawlad goboleedka iyo dawlada dhexe waxaana laga yaabaa in lagu ganaaxo haddii aadan codbixin.

Waxaad xaq u leedahay inaad isqorto codna ka bixiso haddii aad:

- ku noolayd cinwaanka meesha deganaanshaha asalka ah kuu ahayd ugu yaraan hal bil, iyo
- inaad tahay **muwaadin Australiyaana**, ama Ingiriiska dad ka tirsan ah oo aad isqortay 25kii Janaayo 1984 (iyo - doorashada Fiktooriya keliya – haddii aad ahayd Ingiriiska dad ka tirsan waxaasi shardi ah inaad isqortay intii u dhexaysay 26dii Oktoobar 1983 iyo 26kii Janaayo 1984 wada socda); aadna
- tahay **18 sanadood jir** (waxaad is qori kartaa markaad tahay 17 sanadood, laakiin cod ma bixin karto ilaa aad gaarto 18 sanadood).

Waxaa waajib kugu ah inaad cusboonaysiiso isqoristaada mar kasta oo aad guri ka guurto ama haddii aad bedesho magaacaga – adiga oo buuxinaya foom kale oo isqorid ah.

Isku Qorida Doorashada

Doorashooyinka Dawlada dhexe, Goboleed iyo Deegaanka Fiktooriya

Isticmaal foomkaan si aad • isugu qorto codbixinta ama • aad u bedesho meeshaad degan tahay ama ciwaanka boostada ama • u bedesho magaacaga ku qoraan liiska doorashada

MUHIIM — Fadlan akhri macluumaadka boggaan ka hor inta aadan bilaabin buuxinta foomkaan

Isqorida iyo codbixintu waa khasab

Haddii aad shuruudaha buuxiso, waxaa lagaaga baahan yahay inaad isqorto kana codbixiso doorashada dawlada dhexe waxaana laga yaabaa in lagu ganaaxo haddii aadan samayn. Shuruudaha isqorida codkana waa inaad buuxisaa haddii:

- Aad tahay muwaadin Australiyana, ama ka tirsanyd Ingiriis isna qortay 25kii Janaayo 1984 (aadna – Fiktooriya gudaheeda keliya - ahayd ka tirsanayd Ingiriiska isna qortay intii u dhexaysay 26dii Oktoober 1983 iyo 25kii Janaayo 1984 wadajira); aadna
- jirto18 sano*; aadna
- ku noolayd cinwaan ah midka asalka kuu ah ee degaanka ugu yaraan hal bil.

* Waad isqori kartaa markaa 17 sano jirto, laakiin codka ma dhiiban karto ilaa aad gaarto 18 sanadood.

Haddii aad shuruudaha buuxisay hadda is qor

Waxaa waajib kugu ah inaad ku cusboonaysiiso isqoridaada 21 berri gudahood markaad shuruudaha buuxiso (kor eeg). Haddii aad ka guurtay cinwaankaagii hore magacaaga waa laga saarayaa liiska ilaa aad ka buuxiso dalabka cusub ee isku qorida doorashada. Haddii aadan isku qorin ama aadan cusboonaysiin waxaad khatar ugu jirtaa in lagu ganaaxo oo aadan codbixin.

Isqorid khaas ah

La xiriir Victorian Electoral Commission wixii macluumaad ah ee intaas ka badan iyo foomamka dalabyada khaaska ah haddii:

- aadan haysan cinwaan rasmi ah
- aad si ku meel gaara dibada ugu maqan tahay
- aad xabsi ku jirto
- aadan jir ahaan awoodin inaad saxiixdo magacaaga
- aad ka shaqaynayso Anta-artiga
- aadan iman karin maalinta codbixinta
- aad aaminsan tahay in magacaaga lagu muujiyo meel dadka ka dhexaysa ay khatar gelin karto amaankaaga ama kan qoyskaaga.

XASSUUSIN: haddii horay laguu siiyey isqorida qarsoon aadna bedelayso cinwaankaaga, waxaad u baahan tahay inaad isticmaasho foomka isku qorida codbixiyaha aamusan ee khaaska ah ee cinwaankaaga cusub.

- aad ka weyn tahay 70 sanadood aadna doonayso inaad noqoto kuwa boosta codkooda soo dhiga doorashooyinka dawlad goboleedka iyo dawlada hoose.

Maxaa dhacaya markaad soo celiso foomkaaga?

Dalabkaaga waa la hubiyey magacaaga iyo cinwaankaagana waxaa lagu qoray liiska doorashada dawlada dhexe, dalwad goboleedka iyo dawlada hoose haddii aad shuruuda ka bixin karto.

Haddii aadan helin ta'kiidin qoran oo isqoridaada saddex asbuuc gudahood markaad dalbatay ka dib, fadlan wac Australian Electoral Commission tel: **13 23 26**.

Idanka lagu ururiyo macluumaadka foomkaan waxaa lagu hellaa *Xeerka Doorashada Dawlada Dhexe ee 1918* iyo *Xeerka Doorashada Fiktooriya ee 2002*.

Helida macluumaadkaaga

Sida waafaqsan sharciga Dawlada Dhexe iyo Fiktooriya magacyada iyo cinwaanada dhamaan codbixiyayaasha (marka laga saaro ku aamusan) waa in dadweynuhu heli karaan. Liiska doorashada waxaa laga raadin karaa Xafiiska Victorian Electoral Commission (VEC) iyo xafiis kasta oo qaabilsan Australian Electoral Commission (AEC).

Sida waafaqsan sharciga Dawlada dhexe iyo tan Fiktooriya macluumaadka doorashada waxaa la siiyaa shakhsiyaad kale, ururo iyo kooxo sida xisbiyada siyaasada, musharaxiinta, guddiga xeerbeegta iyo dawlada hoose. Hay'adaha kale waxay u hellaan maclumaadka meel-marinta sharciga iyo ka hortaga si loo caawimo baarista cafimaadka iyo cilmi baarista.

Koobiga Barayfasiga VEC iyo liiska hay'adaha hella macluumaadka doorashada sida waafaqsan *Xeerka Doorashada Fiktooriya ee 2002* waxaa laga hellaa websaytka ah www.vec.vic.gov.au ay leedahay VEC.

Liiska hay'adaha xaqa u leh inay hellaan macluumaadka doorashada sida waafaqsan *Xeerka Doorashada Dawlada Dhexe ee 1918* waxaa laga hellaa www.aec.gov.au oo ay leedahay AEC.

AEC iyo VEC waxay isdhaafsadaan macluumaadka doorashda sida waafaqsan heshiiska lagu midaysan yahay si loo cusboonaysiiyo liiska doorashada. Iyada oo qayb ka ah cusboonaysiinta xarakaadka waxaa laga yaabaa in VEC ay daboolka uga ka qaado magacaaga dad kale oo ku nool cinwanka aad ku qoran tahay.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad intaas ka badan

Victorian Electoral Commission
www.vec.vic.gov.au
ama wac **1300 805 478**

Soocelinta foomkaaga

Boostada ku soo celi foomka aad buuxisay:

Victorian Electoral Commission
Reply paid 66506
Melbourne VIC 8001

(Farankaboollo looma baahna haddii aad ka soo dirayso Australia.)

Wax ku caddaynaya

Waxaa waajib kugu ah inaad caddayso aqoonsigaaga xagga isqorida Doorashada Dawlada Dhexe

Sidee u caddaynaysaa aqoonsigaaga?

A Haddii aad haysato **laysanka gaari wadida Australia** su'aasha 8aad ee ku taalla BOGGA A.
Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso soona celiso BOGGA A

B Haddii aadan hayn laysanka gaari wadida Australia waxaad u baahan tahay **shakhsi edman** (arag BOGGA B) **si aad u aragto asalka MID ka mid ah dukumintiyada lagu liisgareeyey BOGGA B**.
Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso soona celiso BOGGA A IYO BOGGA B

C Haddii aadan haysan laysanka gaari wadida Australia AADANA haysan mid ka ah dukumintiga lagu muujiyey BOGGA B, waxaad u baahan tahay **LABA qof oo ku qoran liis doorashada oo ku yiqiinay ugu yaraan hal bil kuwaas oo sheega qofkaad tahay** (arag BOGGA C).
Waxaad u baahan doontaa inaad buuxiso soona celiso BOGGA A iyo BOGGA C

Isqorida doorashada

Dawlada dhexe, dawlad Goboleedka, iyo dawlada hoose ee Fiktooriya

Office use only | Date received | CATS | Notations | ACK | RVI | NIN

I2

Haddii aad ku buuxinayso gacan ku qor: ✗ sanduukha halka ku haboon, khad madow ama buluug ah, iyo FAR WAAWEYN

BOGGA A

1 Macaaga hadda ah

Mr ☐ Mrs ☐ Ms ☐ Miss ☐ Dr ☐ Ama

Magaca qoyska (magaca saddexaad)

Magacaaga ugu horreey

2 Cinwaankaaga saxda ah ee hadda

Si cad u cadday cinwaankaaga deganaanshaha. Magaca goobta ama nambarka adeega boostada kuma filna.

State **VIC** Postcode

3 Cinwaanka boostada Sida kore ☐

State Postcode

4 Faahfaahinta meelaha lala xiriirayo

Khasab maaha – waxaa laga yaabaa in lagaala xiriiro faahfaahinta isqoridaada

Moobaylka Telefoonka maalinimo ( )

Email

5 Taariikhda dhalashada

Ku qor taariikhda maalinta/bisha/sanada sida. 25/03/1975

Sinjiga ☐

6 Ma waxaad isku qoraysaa codbixinta Australia markii ugu Australia?

Haa ☐ ▸ **AAD SU'AASHA 7AAD**

Maya ☐ ▸ **Ma waxaad noo sheegaysaa bedelaada cinwaankaaga?**

Haa ☐ ▸ Waa maxay cinwankaagii hore ama cinwaanka aad ku qoran tahay liiska doorashada?

State Postcode

Ma waxaad noo sheegaysaa bedelaada magacaaga?

Haa ☐ ▸ Magacii hore oo aan lahaa ee qoyska

Magacaaga

7 Dhalasho ahaan ma waxaad tahay muwaadin Australiyaana?

Waad inaad tahay muwaadin Australiyaana ama qof ka tirsanaa Ingiriiska oo isku qoray doorashada 25kii Janaayo 1984 si uu xaq ugu yeesho isqorida.

Haddii aad tahay muwaadin Australiyan ah dhalasho ahaan kaas oo aan ku dhalan Australia bixi macluumaad adoo foomkaan ku lifaaqaya.

Haa ☐ ▸ Magaalada aad ku dhalatay **TAG SU'AASHA 8AAD**

Maya ☐ ▸ Wadankaad ku dhalatay

Ma lagu siiyey dhalashada Australia?

Haa ☐ ▸ Nambarka shahaadada muwaadinka

Maya ☐ ▸ **Ma tahay qof xaq u leh oo ah dadkii Ingiriiska oo is qoray 25kii Janaayo 1984?**

Haa ☐ Maya ☐

Waxaa laga yaabaa in aadan xaq u lahayn inaad codayso. Wac Guddiga Doorashada Fiktooriya tel 131 832

8 Ma haysataa laysanka gaari wadida ee Australia si aad u caddayso aqoonsigaaga isqorida doorashada Dawlada Dhexe?

Nambarka laysanka gaari wadida

Dawlad goboleedka ama territoriska laga bixiyey ▸ **TAG SU'AASHA 9AAD**

Ma haysto laysanka gaari wadida ☐ ▸ **TAG SU'AASHA 10AAD BOGGA B (XASUUSO: waxaa waajib kugu ah inaad saxiixdo markaantina kula saxiixo su'aasha 9aad ka hor inta aadan soo celin foomka)**

9 CADDAYNTAADA

- Waan akhriyey qaybta ku saabsan isqorida iyo cod bixinta bogga macluumaadka
- Xaq ayaan u leeyahay in aan isku qoro cinwaanka kore isqorida dawlada dhexe, dawlad goboleedka, iyo xukuumada doorashada degaanka Fiktooriya
- Dhamaan macluumaadk aan ku bixiyey foomkaan, kaas oo uu ku jiro macluumaad kasta oo lagu bixiyey su'aasha 10aad, iyo/ama lifaaq ahaan waa sax waana dhamaystiran yihiin,
- Aan fahmey in bixinta been abuur keeni karo dembi aad u weyn

Saxiixaaga ama astaan ✍

Taariikh / /

Caddayn markhaanti waa in loo buuxiyaa isqorida dawlad goboleedka iyo xukuumada deegaanka iyo dhamaan kaysaska halka codbixiyuhu calaamadiyey, haddii qofkaasi aanu awoodin in uu saxiixo magaca

CADDAYN MARKHAANTI

- Waxaan ku qornahay doorashada Fiktooriya, waxaana
- Arkay in dalbaduhu saxiixay ama calaamadiyey foomkaan waana ku qanacsanahay in dhamaan caddaymuhu yihiin run

Magaca markhaantiga

Saxiixa markhaantiga ✍

Cinwaanka markhaantiga

A LIISKA LA HUBINAYO

Waxaan ku bixiyey faahfaahinta laysankayga gaari wadida su'aasha 8aad ☐

Daabaco foomkaaga

Dabadeedna saxiix markhaantina ha kula saxiixo su'aasha 9aad

Kuna noqo BOGGA A keliya:

Victorian Electoral Commission
Reply paid 66506
MELBOURNE VIC 8001
(Farankaboollo looma baahna haddii aad ka soo dirayso Australia.)

Click here to clear form

Print

Wax ku caddaynaya

BOGGA B

10 Sidee ugu caddaynaysaa aqoonsigaaga Dawlada Dhexe isku qorida doorashada?

A **Waxaan haystaa laysanka gaari wadida Australia waxaana ku bixiyey laysankayga faahfaahintiisa suaasha 8aad**

Uma baahnid inaad bixiso wax caddayna oo kale.
Daabac, saxiix kuna soo celi BOGGA A Guddiga Doorashada Fiktooriya.

AMA

B **Ma haysto laysanka gaari wadida Australia.**
Waxaan haystaa kii asalka ahaa ee MID ka mid ah dukumintiyada liiska hoos ku yaalla kaas oo aan u isticmaali karo caddayn aqoonsi ah.

Haa ☐ Calaamay hal dukuminti keliya

- ☐ Shahaadada dhalashada, ama tarjumaada *(waa in ay ahaataa Australiyaan lana bixiyey ugu yaraan 5 sano ka hor)*
- ☐ Shahaadada dhalashada Australia
- ☐ Kaarka dhimista ee Centrelink (waa in aanu dhicin)
- ☐ Kaarka dhimista ee Department of Veterans' Affairs *(waa in aanu dhicin)*
- ☐ Kaarka daynta ama bangiga *(waa in aanu dhicin)*
- ☐ Shahaadada ka tegida Xooga Difaaca Australia
- ☐ Dukumintiyada Furiinka ee Maxkamada Qoyska ee Australia
- ☐ Kaarka Aqoonsiga Shaqaalaha *(waa in aanu dhicin sawir iyo saxiixna wataa)*
- ☐ Laysanka hubka dhaca *(waa in aanu dhicin oo leeyahay sawir iyo saxiix)*
- ☐ Dukumintiga ballanta ee Justice of the Peace *(waa inay tahay Australiyaan)*
- ☐ Shahaadada guurka *(waa inay ka diiwaangashan tahay Australia)*
- ☐ Kaarka Medicare-ka
- ☐ Baasaboor *(waa inuu yahay Australiyaan oo aanu dhicin)*
- ☐ Kaarka aqoonsiga da'da, ama hoos yimaadaa hay'ada, xukuumada dawlad goboleed ama degaanka
- ☐ Laysanka amniga/kantaroolida saxmada *(waa in aanu dhicin)*
- ☐ Kaarka aqoonsiga ardayga *(waa in aanu dhicin oo sawir leeyahay)*

Maya ☐ **GAL BOGGA C**

Tus sawirkaaga mid ka mid ah dadka loo edmay in la tuso dukumintiga aqoonsiga.

Nambarka ansixinta

1 Qof ka mid ah guddiga xubnaha ama guddoomiyaha ururada diiwaangashan ee Aboriginiska iyo/ama Torres Strait Islander
2 Xisaabiye (waxaa waajib ah in uu yahay wakiilka cashuurta diiwaangashan)
3 Shaqaalaha dhulka ka shaqeeya ee diyaaradaha rakaabka
4 Guddiga doorashada Australia ama dawlad goboleedyo kale ama shaqaalaha hay'ada doorashada ee territoriga
5 Sarkaalka bangiga, credit union ama sarkaalka building society (marka laga saaro maamulaha xarunta safarka bangiga)
6 karaaniga, sheriff ama qofka damiin maxkamada ka sameeya
7 Xubinta Affidavits-ka, caddaymaha ama Dhaaraha
8 Qof u shaqeeya xukuumada dawlada dhexe, midda goboleed ama territoriska oo joogto ah ama waqti dhiman ah (waxaa ku jira hay'adaha)
9 Xubin baarlamaan oo dawlada dhexe, dawlad goboleedka ama xubinta degmada ama xubin ka mid ah shaqaalaha
10 Xubin ka tirsan Ciidamada xoogga dalka
11 Dhakhtarka ilkaha
12 Shaqaalaha safaarad ama Sarkaalka qunsiliyada (marka laga saaro sarkaalka qunsuliyeed sharafeed)
13 Injineer, mihnadle hawlgashan ama xubnaha jimciyadaha talasiinta injineerada
14 Sarkaal Shirakad lacageed
15 Justice of the Peace
16 Qofka haysta laysanka khamrada (waa in aanu dhicin)
17 Maamule bulsho, qawmiyad ama xarun awoodgelineed oo durugsan
18 Maamule xarun dumar qaxooti ah ama qalalaasaha iyo talasiinta

Nambarka ansixinta

19 Qofka guurka sameeya (si waafaqsan macnaha Xeerka Guurka ee 1961)
20 Ka talabixiye Guur (si waafaqsan macnaha Xeerka Guurka ee 1975)
21 Madaxa markab ganacsi
22 Dhakhtar caafimaad
23 Xubinta Jimciyada Cashuuraha iyo maaraynta Xisaabiyayaasha
24 Xubinta Machadka xoghayayaasha Shirkada Australia
25 Madax diimeed (si waafaqsan macnaha Xeerka Guurka ee 1961)
26 Kalkaaliso, diiwaangashan ama qoran
27 Qof loo shaqaaleeyey booqdaha Xarun awoodgelineed
28 Farmashiye yaqaan
29 Aqoonyahanka dabiici u duugduugida
30 Duuliye (waa in uu haystaa laysan aan dhicin)
31 Sarkaal booliis ama booliisk caawime
32 Madaxa boostada ama qof joogta uga shaqeeya boostada
33 Sarkaalka xabsigaa
34 Wakiilka Guryaha la kiraysto (waa in uu laysan leeyahay ama diiwaangashan yahay)
35 Qof si sharci ah u haya xafiis oo qaata mushahar sanadeed
36 Sahamiye (waa inuu diiwaangashan yahay ama laysan leeyahay)
37 Macalin (dugsi hoose, sarre, iyo jaamacad) (waa in uu ahaado waqti buuxa ama waqti dhiman haddana uu shaqeeyaa)
38 Dhakhtarka xayawaanka
39 Qof aan ku qornayn liiska oo laga yaabo in hay'ad amar lihi ka dhigto si waafaqsan amarka Dawlada dhexe, goboleed ama deegaan

Qofka edmani wuxuu u baahan yahay inuu buuxiyo oo saxiixo caddaynta hoos ku taalla.

CADDAYN — *uu sameyey qof edmani*

- Waxaan ku qornahay liiska doorashada Dawlada Dhexe
- Waxaan ahay qof u edman in la tuso dukuminti aqoonsi
- Waxaan arkay asalka dukuminti aqoonsi ah ee:

Magaca dalbadaha

Magaca saddexaad oo dalbadaha

Magaca qofka u edman

Saxiixa qofka edman ✍

Ansixinta nambarka liiska kore oo badankood ku khuseeya *Nambar*

Cinwaanka qofka edman

B **LIISTADA HUBINTA — haysto laysanka gaari wadida ee Australia, laakiin waxaan haystaa dukumintiga caddaynta aqoonsiga**

- *Waxaan saxiixay foomka* **BOGGA A**
- *Markhaanti ayaa saxiixay foomka* **BOGGA A**
- *Qof edman ayaa arkay asalka dukumintiga aqoonsiga wuuna saxiixay wuxuuna ku bixiyey faahfaahinta* **BOGGA B** *(kor)*

Haddii ay haa tahay saddexdaba ku celi BOGGA A iyo BOOGGA B keliya:
Victorian Electoral Commission
Reply paid 66506
MELBOURNE VIC 8001
(Farankaboollo looma baahna haddii aad ka soo dirayso Australia.)

Click here to clear form

OGSOONOW: **HA BUUXIN boggaan haddii aad ku bixisay faahfaahinta laysanka gaari wadida su'aasha 8aad ama aad isticmaalayso BOGGA B si aad u caddayso aqoonsigaaga.**

C ☐ **Ma haysto laysanka gaari wadida ee Australia mana haysto dukuminti ku yaalla liistada BOGGA B. LABA qof oo u yaqaanay ugu yaraan hal bil ayaa ta'kiidin doona aqoonsigayga hoos.**
(**Ogsoonow**: Dadkaani maaha inay ahaadan dad edman)

CADDAYN — ***LABADA qof oo ta'kiidinaya aqoonsigaa. Dadkaasi waxay ahaan karaan qoys ama deri.***

QOFKA 1AAD

- Waxaan ku qornahay liiska doorashada Dawlada Dhexe
- Waxaan ta'kiidin karaa aqoonsiga dalbadaha

Magaca dalbadaha

Magaca saddexaad ee dalbadaha

- Waxaan aqaanay dalbadaha ugu yaraan hal bil

Magaca qofka 1aad

Saxiixa qofka 1aad ✍

Cinwaanka qofka 1aad

QOFKA 2AAD

- Waxaan ku qornahay liiska doorashada Dawlada Dhexe
- Waxaan ta'kiidin karaa aqoonsiga dalbadaha

Magaca dalbadaha

Magaca saddexaad ee dalbadaha

- Waxaan aqaanay dalbadaha ugu yaraan hal bil

Magaca qofka 2aad

Saxiixa qofka 2aad ✍

Cinwaanka qofka 2aad

C LIISTADA HUBINTA — Ma aan haysto laysanka gaari wadida Australia mana haysto dukuminti caddaynaya aqoonsigayga

- *Waxaan ku saxiixay foomka* BOOGA A
- *Markhaanti ayaa saxiixay foomka* BOGGA A
- *LABA qof ayaa ta'kiidiyey aqoonsigayga WAYNA saxiixeen waxayna ku bixiyeen faahfaahinta* BOGGA C *(kor)*

Haddii ay haa tahay saddexdaba fadlan ku celi BOGGA A iyo BOGGA C keliya:
Victorian Electoral Commission
Reply paid 66506
MELBOURNE VIC 8001
(Farankaboollo looma baahna haddii aad ka soo dirayso Australia.)

Click here to clear form